



✎ Nina Orange
🔊 Wiehan de Jager
📖 Abdi Muse
😊 somaliska
|| nivå 4



Waxa ay Vusi walaashiis tiri

Sagor för barn på svenska




Waxa ay Vusi walaashiis tiri

Skriven av: Nina Orange
Illustrerad av: Wiehan de Jager
Översatt av: Abdi Muse

Denna saga kommer från African Storybook (africanstorybook.org) och vidarebefordras av Sagor för barn på svenska (<https://berattelser.se/>), som erbjuder sagor på många språk som talas i Sverige.

Detta verk är licensierat under en Creative Commons Erkännande 3.0 Internasjonal Licens: <https://creativecommons.org/licenses/by/3.0/deed.sv>



Subax amin aroortii hore ah, ayaa Vusi ayaydiis u yeedhay, "Vusi, fadlan u qaad ukuntan waalidkaada, waxay doonayaan inay u sameeyaan keeg weyn arooska walaashaa".

Jidka marku waalidkiis u sii socday, Vusi wuxuu la
kulmay laba wiil oo midho guranaayo. Mid ka mid
ah ayaa ukun ka dafay Vusi wuxuuna ku toogtay
geed. Ukunti ayaa jabtay.




Vusi walaashiiis way fikirtay in muddo ah, ka dibna
waxay tiri, "Walaalkay Vusi, runtii ma daneeyo
hadiyado, xitaa dan kamalihii keegga! waan wada
joognaa halkan dhamanteen, waan faraxsanahay.
Hada dhar guruxsan xidho oo aan u dabaaldeyno
maallintan!" Taasiine waa sida uu Vusi sameeyey.






“Maxaad samaysay?” Vusi ayaa ku ooyay. “Taas waxay ahayd ukuntii keegga, Keeggii walaashay arooskeda. Maxaay walaashey dhihi doontaa haddii arooskeda uu san keeg jirin?”




“Maxaan sameeyaa?” Vusi ayaa ku qaylinayay. “Saca dib u cararay wuxuu aha hadiyadii badalkii xidhmadii fuundayasha isiiyeen. Fuundayaasha aya isiiyay xidhmada sababtoo ah waxay jabiyeen ushii ay midho guratada isiiyeen. Midho guratada ayaa isiiyay usha sababtoo ah waxay jabiyeen ukuntii keegga. Keegga wuxuu ahaa midkii arooska walaashay. Hada ukun maleh, Keeg maleh, hadiyad maleh.”

Wii!ashii way ka xumaadeen inay ku ciyaareen Vusi.
"Kama caawin karno keegga, laakiin halkan waa
usha socodka ee walaashaa," ayuu yiri mid. Vusi
wuxuu sii watay socodkiisi.



Laakiin sicii wuxuu dib ugu cararay ninkii
beeralayda ahaa. Vusi ne wuu lumay. Wuxuu
imaaday xilli danbe arooski walashiis. Martida ayaa
cuntada cunaysay.






Jidka dhexdiisa wuxuu la kulmay laba nin oo dhisahayo guri. “Ma isticmaali karnaa ushaas xooggan?” waxaa weydiiday mid. Laakin usha ma ahan mid xoogan oo wax lagu dhisi karo, waana jabantahay.



Sicii wuu ka xumaaday iney noqotay mid hunguri wayn. Beeraalihii wuxuu ku raacay in uu Vusi saca hadiyad uqaato. Sidaa daraaddeed Vusi wuuqaatay.




“Maxaad samaysay?” Vusi ayaa ku qayliyay. “Ushaas waxay hadiyad u aahayd walaashay. Kuwii midhaha guran hayay ba isiiyay sababtoo ah waxay jabiyeen ukuntii keegga. Keeggi walaashay arooskeda. Hadda ukun maleh, keeg maleh, hadiyadne majirto. Maxaan walaashey ku dhihi?”



“Maxaad samaysay?” Vusi ayaa ku qayliyay. “Taas waxay hadiyad u aahayd walaashay. Waxaa iigu soo dhiibay guryo dhisayaashi sababtoo ah waxay jabiyeen ushii midho guratada. Midho guratada aya isiiyay sababtoo ah waxay jabiyeen ukuntii keegga. Keegga waxaa loo samayn rabay arooska walaashay. Hada ukun maleh, keeg maleh, hadiyadne maleh. Maxaan kudhihi walaashay?”



Guryo dhisa yaashii way ka xumaadeen inay jebiyeen usha. "Kaama caawin karno keegga, laakiin halkan waa xooga xidhmo ah," ayuu yiri mid. Sidaas daraaddeed Vusi sii watay socodkiisii.



Jidka dhexdiisa, Vusi wuxuu la kulmay beeraley iyo sac. "Maxay tahay xidhmo macaan, maqaniini karaa?" sicii ayaa waydiiyay. Lakiin xidhmadu way macaaneed marka sicii wuu cunay dhamaan!